

Cortimyk

miconazole nitrate
iyo hydrocortisone

Lagu daaweeyo caabuqa cagaha gala ee lagu magacaabo cagta ciyaartooyga ee cuncun xun

Boqoshaadu waxay ku kobocdaa oo ay ku kortaa meelaha diirran ee qoyan ee jirka oo cagaha ayaa si gaar ah ugu nuglan. Calaamadaha caabuqa cagta ciyaartooygu waxa weeyaan cago olol iyo cuncun leh iyadoo haragga u dhexeeya faraha caguhu uu qolof yeesho, uuna diirmo. Caabuqa cagta ciyaartooyga laftigiisu khatar ma leh, laakiin maadaama uu faafo waxaa ugu fiican in daawaynta loo bilaabo sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah.

Disha boqoshaada oo yaraysa cuncunka

Boomaatada ama labeenta Cortimyk waa daawo lagu daaweeyo caabuqa cagta ciyaartooyga ee cuncun xun. Waxaa labeenta ku jira walax boqoshaada dila iyo weliba daawo istiirrod oo khafiif ah oo leh natiijoooyinka celiinta cuncunka iyo bararka, oo lagu daaweeyo calaamadaha cudurka iyo caabuqaba. Marka uu takhtar qoro, waxaa boomaatada Cortimyk weliba loo isticmaali karaa daawaynta caabuqyada kale ee haragga ee boqoshaada.

Sida loo isticmaalo boomaatada Cortimyk

Boomaatada qayb khafiif ah ka mari meesha caabuqa leh iyo 1-2 cm hareeraheed. Ku daawee subax iyo habeen ilaa cuncunku uu go'ayo ka dibna daawaynta sii wad ugu yaraan 1 toddobaad si aad dib u gurashada iskaga ilaaliso. Si taxaddar leh u akhriso buugyaraha ku jira baakadka ka hor inta aadan isticmaalin boomaatada Cortimyk.

Uma baahna in qaboojiye la geliyo



**Boomaatada
Cortimyk 20 g ayaa
weliba riijeeto la'aan
lagaga iibsan karaa
farmashiida**